



# BARNAAMIJKA ADEEGGA TURJUBAANKA

## Haddii Lagu Diiday Turjubaan Nidaamka Cabashada

Waraaqdan waxaa ku faahfaahsan tallaabooyinka uu qaadi karo qofka cabanaya si uu uga soo warbixiyo maxkamad deegaanka ku taalla oo u keeni weyday turjubaan uu u baahnaa, iyadoo ay tahay in la raaco Sharciga 88 [Sup. R. 88].

- 1. Bilaabidda Cabashada.** Dadka aan ku hadlin af Ingiriis fiican, ama qareenkooda, ama qof kale oo u hadlaya, ayaa cabashada si hadal ahaan ah u bilaabi kara iyadoo isticmaalaya siyaabaha soo socda:
  - In ay soo garaaqaan taleefanka lacag la'aanta lagu soo garaaco ee 1.888.317.3177 si ay ula soo xiriiraan Barnaamijka Adeegga Turjubaanka ee Maxkamadda Sare ee Ohio [Supreme Court of Ohio Language Services Program]
  - In ay waraaq u soo qoraan Barnaamijka Adeegga Turjubaanka
  - In ay cabashadooda farriin internetka ah ugu soo qoraan Barnaamijka Adeegga Turjubaanka [www.sc.ohio.gov](http://www.sc.ohio.gov).
- 2. Qaabbilaadda.** Barnaamijka Adeegga Turjubaanka ayaa eegi doona cabashada oo heli doona dadka cabanaya macluumaadkooda arrinta khuseeya oo dhan. Dadka cabanaya waxaa loo sameyn doonaa lambar qaabbilaad oo ujeedkiisu yahay dabasocod iyo feyl-sameyn. Cabshooyinka aan si cad shaaca looga qaadin baaris laguma sameyn doono.
- 3. Xaqiijinta Cabashada.** Barnaamijka Adeegga Turjubaanka 10 maalmood gudahood oo ah kuwa shaqada ayey waraaq ama farriin internet ah dadka uga soo jawaabi doonaan si ay ugu xaqiijiyaan in cabashooyinkoodii laga helay.
- 4. Ogeysiinta Maxkamadda Deegaanka.** Barnaamijka Adeegga Turjubaanka waraaq ayuu u diri doonaa maxkamadda deegaanka ee cabashada laga soo gudbiyey, si loo ogeysiyo cabashada loo hayo. Wixii faahfaahin cabashada khuseeya warqadda ayaa loo raacin doonaa.
- 5. Jawaabta Maxkamadda Deegaanka.** Maxkamadda deegaanka 30 cisho ayey haysataa in ay ugu soo jawaabto Barnaamijka Adeegga Turjubaanka. Jawaabtu waa in ay ahaato mid qoran oo laga helo xal loo soo jeediyey qofka cabanaya. Jawaabta waxaa loo geynayaa garsoore maamul ama maamule maxkamad iyadoo lagu hadlayo magaca maxkamadda deegaanka.
- 6. Eegista Barnaamijka Adeegga Turjubaanka.** Isla marka jawaabta laga helo maxkamadda deegaanka Barnaamijka Adeegga Turjubaanka ayaa koobbi ama nuqul u sii gudbin doona Maxkamadda Sare qareen maamul oo eegi doona. Talada qareenka maamulka ka dib Barnaamijka Adeegga Turjubaanka ayaa maxkamadda deegaanka u gudbin doona in ay fuliyaan xalka la soo jeediyey, ama waxaa maxkamadda deegaanka loo soo jeedin doonaa xal cusub, ama waxaa maxkamadda deegaanka loo sheegi doonaa in cabashadii aan waxba laga soo qaadin. Maxkamadda magaaada waa in ay 10 cisho gudahood warbixinta cabashada ugu soo gudbiyaan Barnaamijka Adeegga Turjubaanka ka dib marka ay fuliyaan xalkii lagu taliyey ama la soo jeediyey.
- 7. Ogeysiinta Dadka Cabanaya.** Barnaamijka Adeegga Turjubaanka ayaa waraaq u diri doona dadka cabanaya, iyadoo loo faahfaahin doono in ay maxkamadda deegaanka fulin doonto jawaabta si cabashadii xal looga gaaro.
- 8. Keydinta Xogta Dadweynuhu Helo.** Barnaamijka Adeegga Turjubaanka wuxuu sameyn doonaa xogta cabashooyinka oo keydsan iyo tallaabooyinkii laga qaaday in lagu xalliyo. Cabashooyinka iyo xiriirkii waraaqaha waxay noqon doonaan waraaqo maamul, iyadoo ay tahay in la raaco Sharciga 44-47 [Sup.R. 44-47].